XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Guddoomiyaha Gobolka ama Badhasaabka

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Fakiska: 503-947-2341

Taariikhda Dhaqangalka: Diseembar 21, 2020

Hagista Gooni Ahaanshaha iyo Karantiilka ee Gobolka oo Dhan

Maamulka: Wareegtada Tirsigeedu Yahay 20-66, ORS 431A.010, ORS 433.004, ORS 433.443

Khusaynta: Hagistan waxay khuseysaa gobolka oo dhan dhammaan shakhsiyaadka dhex jooga Oregon ee daryeel-bixiyahooda caafimaad, saraakiisha caafimaadka bulshada ee gobolka, ama saraakiisha caafimaadka bulshada ee degmada ay go'aamiyeen inuu yahay kiis loo qaateen ah ama kiis la xaqiijiyay ee COVID-19, ama xiriir dhow.

Hirgelinta: Illaa iyo xad hagistan waxay u baahan tahay u hogaansanaanta qodobada qaar, waxaa loo fullin karaa sida lagu qeexay farqadda 10 ee Wareegtada 20-66. Ku guuldareysiga in loo hoggaansamo hagistan waxay sababi kartaa in maamulka caafimaadka bulshada ee gobolka ama degmada soo saaraan amar gooni ahaansho ama amar karantiil oo degdeg ah, ama raadsadaan amar maxkamadeed oo ku saabsan gooni ahaanshaha ama karantiilka sida ku cad ORS 433.121 ilaa 433.140.

Qeexitaano: Ujeedooyinka hagistan dartood, qeexitaanada soo socda ayaa lagu dhaqmi:

- "Xiriir Dhow" waxaa loola jeedaa shaqsi ugu baylah noqday si la taaban karo kiis loo qaateen ah ee COVID-19 ama kiis la xaqiijiyay ee COVID-19.
- "Kiis La Xaqiijiyay ee COVID-19" waxaa loola jeedaa shaqsi laga helay cudurka COVID-19 markii lagu sameeyay baaritaanka unugyada muhiimka ah ee jirka ama baaritaanka wax walbo jirka ka tirsneyn, ama qaab kale ay u tixgeliyeen mid lagu kalsoonaan karo maamulka caafimaadka dadweynaha ee gobolka ama degmada.
- "Gooni Ahaansho" ama "go'doomin" waxaa loola jeedaa kala-soocida iyo xaddidida jireed ee qof qaba cudurka ama si macquul ah loo rumaysan yahay inuu ka soo qaaday cudur la isqaadsiin karo shakhsiyaad aan la gooniyeyn si looga hortago ama loo xaddido u gudbinta cudurka shakhsiyaadka aan la gooniyeyn.
- "Maamulaha caafimaadka bulshada ee degmada" ayaa macnaha ereyga ku bixiyeenl gudaha ORS 431.003.
- "Kiis Loo Qaateen ah ee COVID-19" waxaa loola jeedaa shaqsi qaba astaamo u dhigma COVID-19 iyo shaqsi u dhowaaday qof la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19.
- "Karantiil" waxaa loola jeedaa kala-soocida iyo xaddidaada jireed ee shaqsi baylah u noqday ama laga yaabo inuu baylah u noqday cudur la isqaadsiin karo oo aan ka muuqan calaamado ama astaamo cudurkaas la is qaadsiiyo, shakhsiyaadka aan la kulmin cudur faafa, si looga hortaggo ama xaddido u gudbinta cudurka dadka kale.

- “Sarkaalka caafimaadka gobolka” waa Sarkaalka Caafimaadka Dadweynaha la magacaabay sida ku cad ORS 431.045.
- “U-baylah noqosho la taaban karo” waxaa loola jeedaa inaad:
  - 6 cag u jirsatay kiis la xaqiijiyay ee COVID-19 ama kiis loo qaateen ah ee COVID-19 muddo 15 daqiiqo ah ama ka badan hal maalin gudaheeda.
  - Taabatay dheecaano jeermis leh ama muunado caafimaad ee kiis la xaqiijiyay ee COVID-19 ama kiis loo qaateen ah ee COVID-19.

Kiisaska la xaqiijiyay ee COVID-19 ama kiisaska loo qaateenka ah ee COVID-19 waxaa loo baahan yahay in:

- Go’doomi ugu yaraan 10 maalmood kadib marka uu cudurku ku bilowdo iyo ilaa 72 saacadood kadib marka xumadu ka jabto, iyadoo aan la isticmaalin xannuun baa’bi’iyeyaal, oo astaamaha COVID-19 (xumad, qufac, neefta oo gaabata, iyo shuban) ay soo raysanayaan.
- La go’doomiyo ugu yaraan 10 maalmood kadib taariikhda qaadista muunada laga helay cudurka hadduu astaamo qabin ama kaliya leeyahay astaamo aan ka ahayn qandho, qufac, neef-qabad iyo shuban-biyood.
- La go’doomiyo ugu yaraan 20 maalmood haddii uu qabo jirro daran ilaa ba’an la xiriirta COVID-19, haddii isbitaal loo dhigo COVID-19, ama haddii shaqsigu leeyahay habdhiska difaaca jirka oo aad u liita.
- Ku xirnow maamulka caafimaadka bulshada ee degmada ama gobolka oo raac tallooyinka caafimaadka bulshada.

Xiriirada dhow waxaa looga baahan yahay in:

- La karantiilo ugu yaraan 14 maalmood laga bilaabo taariikhda u-baylah noqoshada la taaban karo ee ugu dambaysay haddii uusan sarkaalka ama wakiilka caafimaadka gobolka, ama maamulka ama wakiilka caafimaadka dadweynaha ee degmada, go'aamin in karantiilka loo soo afjari karo goor hore xiriirka dhow ee aan yeelan wax astaamo ah:
  - 10 maalmood oo karantiil kadib iyadoo aan wax baaritaan ah la samayn; ama
  - 7 maalmood kadib, markaan cudurka looga helin Baaritaanka Wax Walbo Jirka ka Tirsneyn ama Baaritaanka Unugyada Muhiimka ah ee Jirka (NAAT) 48 saacadood gudahooda kahor inta aan lasoo afjarin karantiilka.
  - **Fiiro gaar ah:** Karantiilka muddada gaaban ma ahan ikhtiyaar loogu talagalay dadka deggan ama bukaanada ku jira goobahaan:
    - Xarumaha daryeelka muddada dheer
    - Hoyga waayeelka lagu xannaaneeyo
    - Goobaha daryeelka caafimaadka ee la dego (tusaale, xarumaha daaweynta caafimaadka habdhaqanka ee la dego, xarumaha loogu talagalay dadka naafada ah ee qaba naafada garaadka ama korriinka)

    - Goobaha daryeelka caafimaadka bukaan-jiifka (tus., isbitaallada, hoyga bukaan-jiifka maliilsan)

- La soco astaamaha maalin kasta.
- Go’doomi iyadoo la raacayo hagistan markay nodaan kiis la xaqiijiyay ama kiis loo qaateen ah ee COVID-19 xilliga karantiilka.
- Ku xirnow maamulka caafimaadka bulshada ee degmada ama gobolka oo raac tallooyinka caafimaadka bulshada.

Shakhsiyaadka waa inay, laakiin loogama baahna inay:

- Karantiil ama go’doon galaan haddii mas'uuliyiinta caafimaadka bulshada ee tuulada, gobolka ama degmada go'aamiyaan, iyadoo lagu saleynayo dib-u-eegida xaqiiqooyinka gaarka ah, in talaabada noocaas ah ay lagama maarmaan tahay si loo dhowro caafimaadka bulshada, inkastoo shakhsigu uusan buuxin qeexitaanka xiriir dhow ama kiis loo qaateen ah ama la xaqiijiyay ee COVID-19.

Ka dhaafida shuruudaha karantiilka si loogu laabto shaqada

Shakhsiyaadka, marka laga reebo shaqaalaha daryeelka caafimaadka, ee buuxiya qeexitaanka xiriir dhow ***oo astaamaha qabin,*** xayiraadaha karantiil ayaa laga qaadi karaa si shaqsiga ugu laabto shaqada haddii dhammaan shuruudaha soo socda la buuxiyo:

- Sarkaalka ama wakiilka caafimaadka gobolka, ama maamulka ama wakiilka caafimaadka bulshada ee degmada, ayaa go'aansaday in shaqada shaqsigu ay tahay adeeg muhiim ah ayna jirto shaqaale yaraan; [1]
- Goobta shaqada ee shaqsiga waxay bixisaa kahortag buuxa oo ka dhan ah u gudbinta cudurka dadka kale ee jooga goobta shaqada;
- Batrooniga shaqsiga wuu ka war qabaa xaalada karantiil ee shaqsiga wuxuuna diyaar uyahay in shaqsigu ku soo laabto shaqada;
- Shaqsigu wuxuu oggolaanayaa inuu xirto maaskaro caafimaad ama maaskarada N95 inta uu shaqada ku jiro wuxuuna joogteynayaa ugu yaraan lix (6) cag inuu u jirsado dadka kale mar walba; oo
- Sharciyada Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada ee Oregon kama mamnuucayaan shaqsiga inuu ku noqdo shaqada.

Ka dhaafida hagistan karantiil waa in la qoraa shaqsiguna waa inuu weli indha-indheeyaa shuruudaha karantiil marka uusan shaqada ku jirin.

Ku noqoshada shaqada ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka

Go'aanka sarkaalka caafimaadka bulshada ee gobolka ama degmada loogu oggolaanayo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee qaba kiiska la xaqiijiyay ama loo qaateenka ah ee

---

[1] Go'aaminta waxa ah adeeg muhiimka ayaa la gaari doonaa iyadoo isuduwid isla sameynayaan maamullada gobolka iyo degmada iyo guddiga kormeerka sharciyeed ee waaxdaas.

COVID-19 ama xiriirka dhow ah inuu ku noqdo shaqada inta lagu jiro muddada karantiilka ama gooni ahaanshaha waxaa xukmin doonaan Hagista Daryeelka Caafimaadka, iyo Hagista Kahortagga Cudurrada Daryeelka Caafimaadka iyo Xakamaynta ee COVID-19 ee Maamulka Caafimaadka Oregon.

Dhigaalo dheeraad ah

- Ogow xaqiiqooyinka ku saabsan COVID-19
- Dhigaalada COVID-19 ee loogu talagalay bulshada oo ay ku jiraan dhigaalada loogu talagalay shaqaalaha, batrooniyada, dadka naafada ah, iyo bulshooyinka kale.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, far waaweyn, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us